



Xaaladaha Degdegga ee barafka

Markuu barafka da'ayo, dadka deegaanka waa in ay ka saaraan dhamaan gawaarida wadooyinka Caasimada Hopkins, meelaha gawaarida la dhigto, waddooyinka dhinaca midigta iyo sagxada taaga ah ee la dhigo gawaarido dawlada hoose. Xaalada degdegga barafka waxaa lagu dhawaaqi karaa markuu barafka laba taaka da' o. Xannibaada way sii jiri doonta ilaa wadooyinka gees ka gees laga xaaqayo, meelaha gawaarida la dhigo iyo sagxada taaga ah ee gawaarida dawlada hoose lagu baakimo laga xaaqayo.

Qoto dheerida waxaa lagu cabiraa Hopkins lagamana yaabo inay mar walba lamid noqoto qoto dheerida laga soo sheegay Minneapolis-St. Eelboorka Caalamiga ee Paul. Xaaladaha degdegga barafka Hopkins waxaa loogu dhawaaqi karaa **Leenka Barafka Hopkins, 952-939-1399**. Sidoo kale waxaa lagu baahin karaa Jaanalka 16-aad ee Hopkins Community Cable Channel 16, Twitter, Facebook iyo isgaarsiinta Hopkins.

Warbaahinta maxalliga ah, waxaana ku jiraaan Raadiyaha WCCO-AM iyo Telefishanka WCCO- TV waxaa laga shaaciyaa xaaladaha degdegga barafka; si walboo ay tahay saldhigyadan ma damaanad qaadi karaan in la baahin doono ogaysiiska. Haddaad shakisaan, dadka deegaanka waa in ay soo wacaan Leenka Barafka.

Hadii xaalada deg-degga barafka lagaga dhawaaqo caasimada Hopkins xili galabnimo misa horaanta fiidnimada, **shaqada shaqaalaha hawlaha guud ayaa bilaaban karta wax yar kadib saqda-dhexe kadib, adoo xoojinaayo jiidista gawaarida laga bilaabo 9- ka fiidnimo**. Xaaladaha deg-degga ah ee barafka lagu dhawaaqay 9-ka fiidnimo kadib waxay sababi kartaa in la bilaawo jiidista gawaarida 8-da aroornimo maalinta ku xigta.

Si aad isaga ilaalisid jiidista, dadka meesha degan waa in ay kasoo saaraan gawaarida wadooyinka caasimada iyo meelaha gawaarida la dhigto islamarkii ay maqlaan xaalada deg- degga barafka in lagu dhawaaqay.

Baarkinka xaalada Deg-degga Barafka

Bartamaha Hopkins

- Meesha gawaarida la dhigto ee Maetzold laga bilaabo 1st Street N
- Sagxada gawaarida dawlada hoose lagu baakimo waxay 300 ka xigtaa waqooyiga Beerta Downtown Park waxay ku taalaa Wadada 9th Avenue S
- Sagxada gawaarida lagu baakimo waxay 750 u jirtaa koonfurta Wadada First Street N oo ku taalaa 9th Avenue S



Koonfurta Hopkins

- Bariga Wadada 9th Avenue S iyo waqooyiga Wadada Westbrooke Way taasoo u dhexayso 9th Ave S iyo Nine Mile Creek
- Dhinaca dhamaadka bariga fog 8th Street S agagaarka Togga Valley Park



Buugga Barafka

Hagahaaga amarrada barafka iyo xaaladaha degdegga ah ee barafka gudaha Hopkins

(sidoo kale waxaa laga heli karaa ayagoo Spanish iyo Somali)

www.hopkinsmn.com/488/Snow-Emergencies

Leenka Barafka ee Hopkins
952-939-1399



City of Hopkins

Waaxda Shaqaalaha Dadweynaha

11100 Excelsior Boulevard
Hopkins, MN 55343

952-939-1382

952-939-1381 (Fakis)

www.hopkinsmn.com

Waxaa dib u eegis lagu sameeyay Nofeembar 2020



City of Hopkins

Dhiiri geli. Wax bar. Ku dar. La xiriir.

